Waxbarashada korantada

Madoonaysaa in aad kashaqeysid shaqooyin marwalba dadaal isbadel horumar ah oo balaadhan sameeya?
Madoonaysaa in aad kashaqeysid ama waxkabaratid dalalkale oo shi-sheeya?
Madoonaysaa in aad shaqeysid kadib marka aad dhameysatid waxbarashadada dugsiga sare?
Madoonaysaa in aad laahatid fursad aad u balaadhan oo aad shirkad aad adigu leedahay aad ku aas –aasaatid?
Madoonaysaa in aad noqotid, kana shaqeysid waxyalo dhamaan bulshoweynta u muhiim ah?
Haddaba waxbarashadan korantadu waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan korantada ama dabka waxaa aad baran doontaa shaqooyin farabadan aasaaskooda hore, iyo isbadeladooda.Waxaad kaloo aad fahmidoontaa waxyaalo badan oo nolol maal meedka ah oo ku lugleh korontada! Waxaad haddaba aad garan doontaa aqoonta korontadu sida ay ubalaadhantahay una baxaad weyntahay.Waxaad barandoontaa oo kale waxbarasho adiga gaar kuu noqonkareysa waxtarweyna kuu yeelankarta, waxaa intaas dheer in aad barandoontid sidii aad dadka aad ula shaqeeyn lahayd .Waxaad barandoonta asaaska iyo bilowga hore ee korontada, sida tusaalo ahaan,nabadgelyada iyo digtoonaata iyo taxadirka, foojignaanta, iyo habka adeega bulshada.

Wax barashadan dabka waxa aad ka shaqeyn kartaa meelwalba oo aad dooneysid dunida in aad ka shaqeysid.Shaqo waad raadsankartaa kadib marka aad waxbarashadaada dugsiga sare aad dhameysatid, ama haddii kale wax barashadaaada ayaad si wadan kareysaa haddii aad dooneysid.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada aad siiwadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan ah korontada, shaqo toos ah waad rad sankareysaa kadib marka aad ka qalinjebisid ama aad kabaxdid waxbarashada dugsiga sare.Shaqooyinka aad raadsankareysid waxa ay ku xidhantahay hadba takhasuska aad heysatid ee aad baratay.Waxaa mararka qaarkood suurtowda in aad tababar xirfadeed aad sameysid inta aad waxbarashada aad ku jirtid, kaas oo noqon kara mudo sanad ama in kabadan. Waxaana lagu siin karaa oo aad qaadankareysaa lacagta tababar xirfadeedka laqaato, waxaana aad lashaqeen doontaa dad, ama aad racidoonta dad xirfadan u howlgala aadna u yaqaana .Aqoon iyo waayo aragnimana aad uga faa ideesan doontid. Waxayna leeyihiin khibrad aad u balaadhan , mudo aad u badana wey ka soo shaqeeyeen xirfadan.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Marka aad waxbarashadan korontada aad qalinjabisid waxa aad kashaqeynkareysaa tusaalo ahaan sida farsamo yaqaan koronto ee warshadeed, farsamo yaqaanka datada, farsamo yaqaanka sameynta datada, farsamayaqaanka isku xidhka datooyinka iyo kashaqeeysinta

internetka iwm. Koranto yaqaan,farsamo yaqan sameeya kahortega qalabka dabka ee digniinta bixiya, farsamo yaqaanka biyaha,iyo farsamo yaqaanka wiisheshka.

Haddii aad jeclaatid in aad waxbarshadaada aad sii wadatid kadib marka aad qalinjebisid waxbarashada dugsiga sare. Wax aad heli kareysaa oo aad raadsankartaa shaqooyin aad u farabadan oo aad u kaladuwan. Dadka koronta yaqaanka ah aad ayey bulshadu ugu baahantahay.

Haddii aad iminkaba aad ogtahay waxa aad dooneysid in aad kashaqeysid, waxa aad haddaba aad kala tashankartaa qofka xogogaalka u ah waxabarashooyinka iyo xirfadaha dugsiyada. Qofka aad lakulmi doontid hanoqdo qof dumar ah ama qof nin ah, isaga ayaa kaacaawindoona waxbarashada aad dooneysid iyo takhasuska aad dooneysid in aad baratid.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan dabka waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo daas qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo u gaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashadan dabka oo kaliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 4 takhasusood oo kaladuwan.Taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan korontada ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ayrabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga ay ku anfacikaraan ama ay kugu haboonyihiin. Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa ka mid ah.

- Kali iswade- waxa uu khuseeya adiga hadii aad doonayasid in aad ku shaqeeysid sida, qeybaha kaladuwan ee farabadan ee wax warshadeentu marto, iyo warshadeenta, Tusale wax soosaarka warshadaha.

- Farsamada daatooyinka iyo kumbuutarada. Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad dooneysid in aad ku shaqeeysid farsamada daatooyinka, ama noqotid farsame yaqaan daatooyinka, sida tusaale ahan sameeye daatooyin iyo iskuxidhka internetka iyo datooyinka iwm.

- Farsamada Elikteroniga- Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad dooneysid in aad ku shaqeeysid wax cusbooneysid sida wax alale wixii ku shaqeeya koronto ee la isticmaalo, loona istic maalo adeega hawlfududeenta iwm

- Farsamada korontada- Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad dooneysid in aad ku shaqeeysid, isku xidhka korontooyinka iyo qalabada loo adeegsado wixii dignii badbaado ah.

Xiidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada korontada waxa aad isku deyi kareysaa in aad shaqeysid. Waxaad kaloo aad heysataa ilaa iyo 15 isbuuc ah dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay ama xaafada aad degentahay.Waxaad laxidhiidhi kareysaa shirkad aad adigu xidhiidh la leedahay ama shirkado kale oo kukala yaala wadano kale oo badan. Waana habka u wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiidhna aad ku sameysankartid.Xidhiidhkaas oo aad markale aad kagafaa ideeysankartid haddii aad istirahdi shaqo raadso mustaqbalka.
Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada, way suurtogol noqon kareysaa in aad heshid tababarkaas.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Mudooyinkii ahaa sanadihii ugu danbeeyey waxaa aad loogu baahdey dad koorontiisteyaal ahaa ama dabyaqaano koronto,waxa kale oo dhacday in dadkale oo aan aheeyn korontiistayal in ay wax barashadan ay bilaabaan.Sidaas darteed waxaa dhicikarta in ay atkaato sidii aad shaqo aad ugu heli laheyd farsamadan korontada ah marka aad baratid oo aad waxbarashadaada dhameysid. Nasiibkaaga shaqo oo ah in aad shaqo aad ku heshid xirfadan waxaa suurto gelinkara marba waxa aad dooratay in aad baratid iyo weliba waxa aad takhasuska aad kadhigatay. Xirfadan waxaa dhacda marba in ay isbedesho mudo gaaban. Weyna adagtahay in la saadaaliyo mustaqbalka shaqo sida ay noqonkarto haddii sifudu shaqo loo helikaro iyo inkaleba.